**OHSU**
**Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha**

| | | |
|---|---|---|
| Duk. #: HC-FSM-112-POL Rev. 030226 | Qaybta: Hagaha Adeegyada Maaliyadda | |
| Taariikhda Bilaabista: 12/12/2007 | Taariikhda Dhaqangalka: 04/08/2026 | Taariikhda Dib u Eegista Xigta: 02/08/2027 |
| Dib-u-eegaha (Xilka): Agaasime Sare, Helitaanka Bukaanka | Mulkiilaha (Xilka): Agaasime Sare, Helitaanka Bukaanka | |

**UJEEDADA:**

Xeerkani wuxu bixinaya tilmaamo ah sida loo maareeyo kaalmada dhaqaale ee bukaanada daryeelka ka helaya OHSU. Gaar ahaan, xeerkani:

- Wuxuu ku daraya sababaha u-qalmitaanka Kaalmada Dhaqaale, oo ay ku jiraan daryeelka bilaashka ah iyo kan qiimo dhimista labadaba.
- Wuxuu qeexayaa sida ay OHSU u go'aamiso qaddarka ay bukaanada u qalma Kaalmada Dhaqaale bixin doonaan iyadoo la raacayo xeerkan.
- Wuxuu qeexayaa adeegyada u qalma kaalmada dhaqaale.
- Wuxuu qeexayaa cidda u qalanta baaritaanka maaliyadeed ee gacanta iyo kuwa tooska ah.
- Wuxuu qeexayaa siday bukaanadu u codsadaan Kaalmada Dhaqaale.
- Wuxuu qeexayaa sida ay xaruntu ugu baahin doonto xeerkan bulshada uu u adeego.
- Wuxuu qeexayaa sida ay xaruntu u xaddidayso lacagta lagu soo dallaco bukaanada u qalma Kaalmada Dhaqaale.
- Wuxuu qeexayaa hab-dhaqanka biilasha iyo ururinta ee xarunta.

**DADKA LA SAAMEEYAY:**

Xeerkani wuxu khuseyaa bukaanada OHSU ee daryeelka ku hela isbitaal, bukaan-socodka, kalkaaliye caafimaad, iyo/ama goobta bukaan-socodka ah.

**XEERKA:**

OHSU waxay buuxisaa waajibaadka bulshada si ay u bixiso kaalmo dhaqaale si caddaalad ah, joogto ah, iyo ujeedo leh. Iyada oo ay ku saleysan tahay u-qalmitaanka baaritaanka gacanta, baaritaanka tooska ah, ama habraaca codsiga, OHSU waxay ka caawisaa dadka qaba baahida dhaqaale iyadoo siinayso qiimo dhimis ama iyadoo ka tanaasulaysa dhammaan ama qayb ka mid ah kharashyada adeegyada lagu bixiyo sida ku xusan xeerkan.

**QEEXITAANNADA:**

1. **Kaalmo Dhaqaale:** Cafiska ama qiimo dhimista kharashyada adeegyada caafimaad ahaan loo baahan yahay ee bukaannadu ay mas'uul ka yihiin oo aysan awoodin inay bixiyaan iyadoo lagu saleynayo heerka dakhliga, tirada qoyska, falanqaynta dhaqaale, ama tilmaamayaasha dadweynaha.
2. **Adeegyada Caafimaad Ahaan Loo Baahan Yahay:** "Caafimaad Ahaan Loo Baahan Yahay" waxaa loola jeedaa adeegyada daryeelka caafimaadka ee loo baahan yahay si looga hortago, loo ogaado ama loo daweeyo xanuun, dhaawac, xaalad ama cudur, ama calaamadaha jirro kasta, dhaawac, xaalad ama cudur, iyo buuxinta heerarka daawada ee la aqbalay. OHSU waxay isticmaashaa Liiska Oregon Health Plan (OHP) ee Adeegyada Caafimaadka ee Mudnaanta La Siiyay marka ay go'aaminayso in adeeggu uu yahay mid caafimaad ahaan loo baahan yahay oo u qalma kaalmo dhaqaale. Adeegyada qurxinta, tijaabada ah ama qayb ka ah barnaamijka cilmi-baarista caafimaadka looma tixgeliyo Adeegyada Caafimaad Ahaan Loo Baahan Yahay ujeeddooyinka xeerkan awgiis.
3. **Aagga Adeegga Aasaasiga ah:** Bulshada ugu horreysa ee OHSU ay u adeegto waa bukaanada ku nool Gobolka Oregon iyo degmooyinka soo socda ee Gobolka Washington ee ku xiga Oregon: Pacific, Lewis, Wahkiakum,

Cowlitz, Clark, Skamania, Yakima, Klickitat, Benton, Walla Walla, iyo Columbia. In kasta oo tani ay tahay aagga adeegga aasaasiga ah ee OHSU, dhammaan bukaanada si joogto ah ugu nool Mareykanka waxay xaq u leeyihiin kaalmo dhaqaale. Caddeynta Degenaanshaha ayaa loo baahan yahay, iyo tusaalooyinka dukumentiyada ku habboonna waxaa badanaa ka mid ah kaararka aqoonsiga/ruqsadaha darawalnimada ee gobolku bixiyay, heshiisyada kirada guryaha, dukumentiyada ku habboon (tusaale ahaan, isticmaalka hoyga, kaalmada ay dawladdu bixisay, iwm.), iyo/ama nuqullada soo celinta canshuurta dakhliga gobolka.

4. **<u>Bukaanka Caalamiga ah:</u>** Qof kasta oo raadinaya ama daryeel caafimaad ka helaya OHSU oo ku nool Mareykanka si ku meel gaar ah (tusaale ahaan, kuwa haysta fiisaha aan soogalootiga ahayn, sida Fiisaha Booqdaha/B2, Fiisaha Ardayga/F1).
5. **<u>Xubnaha Qoyska/Reerka:</u>** Qoys waa shaqsi keli ah oo 18 sano jir ah ama ka weyn, ama qof iyo xaaskiisa/saygiisa, lammaanaha guriga, iyo carruurta ku tiirsan ee ka yar 18 sano, kuwaas oo ku nool isla guriga; iyo qof kasta oo kale oo qofku uu mas'uul ka yahay dhaqaale ahaan oo ku sheegan canshuurta inuu ku tiirsan yahay qofka ku nool gudaha ama dibadda guriga.
6. **<u>Tilmaamaha Federaalka ee Saboolnimada:</u>** Heerka dakhliga ee dawladda federaalku u isticmaasho qeexidda saboolnimada.
7. **<u>Dakhliga Qoyska:</u>** Dakhliga dhammaan xubnaha qoyska/reerka ee ku nool isla guriga bukaanka ama cinwaanka guriga bukaanku uu u isticmaalo canshuur celinta ama dukumentiyada kale ee dawladda.
8. **<u>Baaritaanka Tooska ah ee Kaalmada Dhaqaalaha:</u>** Habraaca ay OHSU dhaqaale ahaan u baarto bukaanada helaya adeegyada caafimaad ahaan loo baahan yahay ee kaalmada dhaqaalaha marka bukaanku lagu yeesho wax ka badan $1500, bukaan kasta oo aan caymis lahayn, ama bukaanada ka diiwaan gashan barnaamijyada kaalmada caafimaadka ee gobolka. Baaritaankan waxaa markaas loo isticmaalaa in lagu aqoonsado go'aaminta kaalmada dhaqaalaha.
9. **<u>Codsiga Kaalmada Dhaqaalaha:</u>** Foom ay bukaanku buuxin karaan sababtoo ah waxay rabaan inay codsadaan kaalmo dhaqaale.
10. **<u>Adeegyada Aan La Caymin ee OHP:</u>** Guddiga Dib-u-eegista Caddeynta Caafimaadka ee Oregon wuxuu hayaa liiska isku-xidhka xaaladaha iyo daaweynta oo loo yaqaan "Liiska Adeegyada Caafimaadka ee Mudnaanta Leh". Isku-xidhkan wuxuu Gobolka u kala saraysiiyay mudnaan laga bilaabo tan ugu muhiimsan ilaa tan ugu muhiimada yar oo ka dibna wuxu u qoondeeyay lambar gooni ah. Adeegyada mudnaanta loo siiyo sida ugu muhiimsan waxaa maalgeliya Gobolka iyadoo qayb ka ah Oregon Health Plan. Heerka maalgelinta waxaa lagu dejiyaa xariiq ay Gobolku u qoondeysay. Taas macnaheedu waa isku-xidh kasta oo ka sarre mara xariiqda waxaa loo arkaa mid la maalgeliyey. Isku-xidh kasta oo hoos ka mara xariiqda lama maalgelinayo. Adeegyada xariiqda ka hooseya waxaa badanaa loo kala saaraa daawayn aan lahayn natiijooyin faa'iido leh, daawaynta sababaha is qurxinta, iyo xaalado iskood isu xalliya. Intaa waxaa dheer, qaar ka mid ah adeegyada caafimaadka ayaa laga reebay maalgelinta sida ku xusan xeerka ORS 410-120-1200 "Adeegyada Laga Saaray iyo Xaddidaadaha".
11. **<u>Lacagta Guud ahaan La Qaado (AGB):</u>** Celcelis ahaan lacagta laga helo Medicare, Medicaid, bixiyayaasha kale' iyo lacagaha bukaanka ee adeegyada, habraacyada iyo baaritaannada. Tan waxaa badanaa lagu qeexaa boqolkiiba qiyaasta khidmadaha guud.
12. **<u>Qorshaha Wadaagga Kharashka Caafimaadka:</u>** Qorshayaasha wadaagga kharashka caafimaadka, ama bulsho wadaagga caafimaadka, waa koox dad ah oo isku fikir ah oo isku raacay inay isku yimaadaan oo ay iska caawiyaan bixinta kharashaadkooda caafimaad. Qorshayaasha kharash-wadaagga caafimaadka badanaa si toos ah lacagta uma siiyo bixiyaha daryeelka caafimaadka. Taa beddelkeeda, waxay lacagta siiyaan bukaanka, ka dibna bukaanka aya sii siiya bixiyaha daryeelka caafimaadka.
13. **<u>Akoonka Lacagta mudo-dhaafka ah:</u>** Akoon waxaa loo tixgaliyaa mudo-dhaaf marka haraaga bukaanka aan la xalin ka dib seddex (3) bayaan iyo/ama 90 maalmood laga bilaabo taariikhda bayaanka ugu horeeya.

**<u>ERAYADA MUHIIMKA AH:</u>** Dhaqaale, Kaalmo, Baaritaanka Dhaqaalaha, Codsiga Kaalmada Dhaqaalaha, KDh

**MAS'UULIYADDAHA:**

Shaqaalaha OHSU ee ku lug leh maaraynta codsiga kaalmada dhaqaalaha ee ka imanaya bukaanka daryeel ka helaya ama ka helay OHSU ayaa mas'uul ka ah fahamka iyo u hoggaansanaanta xeerkan.

**SHURUUDAHA XEERKA:**

1. Isgaarsiinta Kaalmada Dhaqaalaha iyo Waxbarashada Bukaanka
    a. OHSU waxay sameyneysaa dadaal kasta si aan bukaanadayada u siino macluumaadka Kaalmada Dhaqaalaha, oo ay ku jiraan, balse aan ku xaddidnayn:
        i. Macluumaadka ku saabsan xeerka kaalmada dhaqaalaha waxaa lagu heli karaa, isaga oo bilaash ah, taleefanka, shaqsi ahaan, ama qoraal ahaan. Eeg Lifaaqa D si aad u hesho macluumaadka xiriirka.
        ii. Calaamado ku yaal meelaha ugu muhiimsan ee bukaanka lagu qaabilo ee isbitaal kasta iyo goobaha bukaan socodka.
        iii. Buug-yaraha ama agabyada dheeraadka ah ee sharraxaya Kaalmada Dhaqaalaha waxaa laga heli karaa marka laga codsado dhammaan meelaha daryeelka bukaanka.
        iv. Bayaanka biilasha waxaa ku jira macluumaad ku saabsan helitaanka Kaalmada Dhaqaalaha.
        v. Mareegaha internetka waxaa ku jira macluumaad ku saabsan helitaanka Kaalmada Dhaqaalaha.
        vi. OHSU waxay bixisaa adeegga macaamiilka ee kaalmada dhaqaalaha Isniinta ilaa Jimcaha iyadoo la heli karo fariimaha codka.
        vii. Shaqaalaha Adeegyada Maaliyadeed ee Bukaanka ayaa laga heli karaa OHSU si ay uga caawiyaan bukaanada fahamka iyo codsashada agabka la heli karo, oo ay ku jirto Barnaamijka Gargaarka Maaliyadeed.
        viii. OHSU waxay nuqullo xeerkan ah ku diyaarisaa meelaha ugu muhiimsan ee bukaanka lagu qaabilo ee isbitaal kasta iyo xarumaha hoos yimaada marka la codsado.
        ix. OHSU waxay ku bixisaa Xeerkayaga Kaalmada Dhaqaalaha, tilmaamaha, iyo codsiga luqadaha ay ku hadlaan dad ka yar 1000 qof ama 5% ama ka badan oo dadka ku nool aagga adeegga aasaasiga ah ee OHSU.
        x. OHSU waxay bixisaa adeegyada turjumaanka si ay u turjumaan dukumentiyada ama uga caawiyaan habraaca codsiga sida loogu baahdo.
        xi. OHSU waxay u baahan tahay hay'ad kasta oo wax ururiso, oo akoonnada la gudbiyay, inay bixiso lambar taleefan oo uu bukaanku wici karo si uu u codsado kaalmo dhaqaale. Shaqaalaha Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka ayaa lagu heli karaa taleefanka si ay uga caawiyaan bukaanada inay aqoonsadaan fursadaha dhaqaale ee ku habboon ama barnaamijyada kaalmada.

2. Aan u qalmin Kaalmo Dhaqaale Marka la Eego Xeerkan
    a. Kaalmo dhaqaale looma heli karo bukaannada caalamiga ah.
    b. Kaalmo dhaqaale looma heli karo bukaannada leh qorshayaasha kharash-wadaagga ilaa ay ka muujiyaan caddaynta lacag-bixinta qorshahooda kharash-wadaagga ka dib adeegga.
    c. Adeegyada iyo xaaladaha bukaanku uusan u qalmi doonin Kaalmo Dhaqaale ee hoos yimaada xeerkan waxaa ka mid ah:
        i. Adeegyada loo arko kuwo aan-la-caymin ama caafimaad ahaan aan loo baahnayn marka la eego Liiska Adeegyada Caafimaadka ee Mudnaanta Leh ee OHP.
        ii. Adeegyada la siiyo bukaanka ay OHSU tahay meel shabakadda-ka-baxsan iyo sidoo kale adeegyada aan guud ahaan lagu caymin shabakaddaada. Waxaan samayn karnaa ka-reebis haddii aan helno oggolaansha shabakadda-ka-baxsan, heerarka lacag-bixinta ee dejisan, oo aan nahay kaliya nidaamka caafimaad ee bixin kara daryeelka. Kaalmada dhaqaalaha waxaa la isticmaali doonaa oo keliya marka aan lacag ka helno shirkaddada caymiskaaga.

iii. Bukaannada aan mas'uul ka ahayn biilka (tusaale ahaan, taageerada ay Bulshadu/Hay'addu maalgeliso).
iv. Bukaanada haysta caymis laakiin doorta inaysan isticmaalin caymiska.
v. Doorashada qaliinka qurxinta.
vi. Habraacyada kale ee ikhtiyaariga ah (tusaale ahaan, waxaa ku jira balse aan ku xaddidnayn qaar ka mid ah adeegyada dhalmo la'aanta, dib u soo celinta jeermis-saaraha, gudniinka marka aan caafimaad ahaan la tilmaamin, baaritaannada aragga ee joogtada ah ee dadka waaweyn ee ka weyn 21, iwm.).
vii. Bukaanku ma uusan buuxin shuruudaha kala duwan ee baaritanka dhaqaalaha ee Beerista iyo daawaynta CAR-T ka hor inta aan la qallinka daawaynta.
viii. Guriga u qaado daawooyinka ama agabyada uu bixiyay farmashiyaha.
ix. Qalabka caafimaadka ee waara (tusaale ahaan, qalabka caafimaadka iyo agabyada ay OHSU lacag ka qadin, alaabada tafaariiqda sida ookiylaha indhaha iyo muraayadaha indhaha, ama qalabka loo isticmaalo daaweynta neefta oo ku qabata xiliga hurdada).
x. Adeegyada tijaabada ah ama adeegyada qayb ka ah tijaabada cilmi-baarista.
xi. Adeegyada laga bixiyo meelahaas rugta caafimaadka ee ku qoran Lifaaqa C. Tani waxaa ka mid ah adeegyada School of Dentistry ee hoos yimaada Barnaamijka Adeegyada Qiimo dhimista ee School of Dentistry, iyo sidoo kale Richmond Family Medicine iyo East Portland Family Medicine.

d. OHSU iyo hay'adaha ururinta lacagaha ma bixin doonaan caawimo ka dib marka akoonku galo dacwadaha maxkamadda sharciga ah.

3. <u>U-qalmitaanka</u>
   a. U-qalmitaanka Kaalmada Dhaqaalaha waxaa lagu sharraxay hoos:
      i. Bukaannada ku nool Mareykanka waxay u qalmi karaan Kaalmada Dhaqaalaha sida waafaqsan xeerkan haddii dakhliga qoyskooda/reerkooda uu yahay ama ka hooseeyo 400% Heerka Saboolnimada Federaalka (FPL). Heerka kaalmada dhaqaalaha wuxuu ku salaysan yahay tirada qoyska iyo dakhliga. Tilmaamaha Federaalka Saboolnimada ee hadda jira waxaa laga heli karaa http://aspe.hhs.gov/poverty/ iyo Lifaaqa A ee hoose. Heerarka u-qalmitaanka waxaa lagu faahfaahiyay qaybta Heerarka Kaalmada Dhaqaalaha ee hoose.
   b. Kaalmada dhaqaalaha waa mid ka sarreysa dhammaan ilaha kale ee dhaqaale ee bukaanka heli karo, oo ay ku jiraan caymiska, barnaamijyada dowladda, qorshayaasha kharash-wadaagga caafimaadka, iyo mas'uuliyadda dhinac saddexaad.
   c. Iyada oo qayb ka ah habraaca baaritaanka kaalmada dhaqaalaha, bukaanada waxaa loo gudbin doonaa inay codsadaan caymis kale oo ay u qalmi karaan. Bukaannada waxaa lagu dhiirigelinayaa inay codsadaan caymis kasta oo kale oo la heli karo. Tan waxaa ka mid ah, balse aan ku xaddidnayn, barnaamijyada ay maalgeliso Gobolka ama federaalka, sida Medicaid iyo Medicare.

4. <u>Heerarka Kaalmada Dhaqaalaha</u>
   a. Kaalmada Dhaqaalaha oo buuxa ayaa badanaa la siin doonaa cidda mas'uulka ah oo leh dakhliga qoyska guud oo ah ama ka hooseeya 300% Heerka Saboolnimada Federaalka (FPL). Eeg Lifaaqa A si aad u hesho dakhliga hadda ee Heerka Saboolnimada Federaalka ee qoys kasta.
   b. 65% kaalmo ah ayaa badanaa la siin doonaa cidda mas'uulka ah oo leh dakhliga qoyska guud ee u dhexeeya 300% iyo 400% Heerka Saboolnimada Federaalka. Qiimo dhimista 65% ah aya loo xisaabi doonaa kharashyada ka yar 35% qiimo dhimista iska-bixinta si loo hubiyo in bukaanada u qalma kaalmada dhaqaalaha aan lagu soo dalacin wax ka badan inta guud ahaan la soo dalacayo. Eeg Lifaaqa B si aad u ogaato sida loo xisaabiyo lacagta guud ahaan la soo dallaco.

| Bukaanada aan caymiska lahayn - Daryeelka Degdegga ah iyo kan Caafimaad Ahaan Loo Baahan Yahay | |
|---|---|
| Dakhliga Qoyska | Qaddarka lagu soo dallacay |
| 300% ama ka yar Heerka Federaalka ee Saboolnimada | Eber |
| >300% ilaa 400% Heerka Federaalka ee Saboolnimada | 35% khidmadaha oo laga jaray 35% qiimo dhimisteena iska-bixinta |
| **Bukaannada ganacsi ahaan caymisan - Daryeelka Degdegga ah iyo kan Caafimaad ahaan Loo Baahan Yahay** | |
| Dakhliga Qoyska | Qaddarka lagu soo dallacay |
| 300% ama ka yar Heerka Federaalka ee Saboolnimada | Eber |
| >300% ilaa 400% Heerka Federaalka ee Saboolnimada | 35% haraaga ka dib caymiska |

5. Hanaanka Baaritaanka Dhaqaalaha ee Gacanta ah
    a. Baaritaanka dhaqaalaha ee gacanta ayaa loo dhammaystiray dhammaan bukaanada iskood iska bixiya iyo bukaan kasta oo muujiya inaanu awoodin inuu bixiyo.
    b. Codsiyada kaalmada dhaqaalaha ee gacanta waxaa sidoo kale soo jeedin kara ilo aan ahayn bukaanka, sida dhakhtarka bukaanka, xubnaha qoyska, kooxaha bulshada ama diinta, adeegyada bulshada, ama shaqaalaha nidaamka caafimaadka. Shaqaaluhu waxay la xiriiri doonaan bukaanka ama wakiilkooda si ay u dhammaystiraan baaritaanka.
    c. Marka gacanta lagu baarayo OHSU waxay dib u eegtaa dakhliga qoyska ee bukaanka ama cidda mas'uulka ka ah (tusaale ahaan, xaaska/sayga, lammaanaha guriga, mas'uulka sharciga ah, iwm.), tirada dadka ku jira guriga, iyo hubinta deynta jilicsan ayaa la dhammaystiraa si loo go'aamiyo u-qalmitaanka. Go'aaminta gunnada dhibrinta ayaa si gaar ah loogu samayn karaa xaaladaha fududeynaya marka qoyska bukaanka la ogaado inaysan buuxin tilmaamaha dakhliga ee kaalmada dhaqaalaha. Fadlan la xiriir xafiiska biilasha si aad u ogaato u-qalmitaanka gunnada dhibrinta. Eeg Lifaaqa D si aad u hesho macluumaadka xiriirka.
    d. OHSU waxay macluumaadka lagu bixiyay habka baaritaanka gacanta u hayn doontaa si qarsoon.
    e. Xaaladaha qaarkood, kaalmada dhaqaalaha lama go'aamin doono iyada oo aan wax Codsiga Kaalmada Dhaqaalaha ah la dhammaystirin ama Baaritaanka. Haddii macluumaad ku filan laga heli karo habraaca baaritaanka dhaqaalaha ee gacanta kaas oo u oggolaanaya go'aanka kama dambaysta ah, looma baahna codsiga kaalmada dhaqaalaha.
    f. Ogeysiiska go'aamada kaalmada dhaqaalaha waxaa boostada loogu soo diri doonaa cidda mas'uulka ka ah.

6. Baaritaanka Tooska ah ee Kaalmada Dhaqaalaha
    a. Dhammaan bukaanada helay adeegyada caafimaad ahaan loo baahan yahay isla markaana lagu leeyahay wax ka badan $1500, iyo sidoo kale dhammaan bukaanada aan caymiska lahayn iyo kuwa u qalma barnaamijyada kaalmada caafimaadka ee gobolka, waa la baari doonaa ka hor inta aysan helin warbixinta biilasha.
    b. Tirada qoyska iyo dakhliga waxaa laga codsan doonaa cidda mas'uulka ah iyadoo qayb ka ah habraaca baaritaanka taleefanka, MyChart, iimaylka, ama boostada. Tani waxay kaa caawin doontaa qiyaasidda heerka saboolnimada federaalka ee bukaanka. OHSU waxay sidoo kale eegtaa si ay u aragto haddii bukaanku uu yahay ama uu u qalmay barnaamijyo kala duwan waagii hore kuwaas oo sidoo kale gacan ka geysan lahaa go'aaminta tani.
    c. Heerka saboolnimada federaalka ee la qiyaasay waxaa loo isticmaalaa in lagu go'aamiyo go'aaminta kaalmada dhaqaale ee bukaanka ee hordhaca ah ee:
        i. Aan u qalmin
        ii. Macluumaad ku filan aan lahayn
        iii. 100% La Ansixiyay
        iv. 65% La Ansixiyay

d. Ogolaansho kasta oo hordhac ah ee kaalmo dhaqaale ayaa si toos ah loogu dabaqi doonaa haraaga bukaanka ka hor inta aan la soo dalacin.
e. Bukaannada waxaa heerkooda kaalmada dhaqaalaha ee la filayo lagu ogeysiin doonaa MyChart ama warqad boostada loogu soo diri doono haddii 100% la ansixiyay. Si loo helo go'aanno la saadaalin karo oo ah in aanu qofku u qalmin, macluumaad ku filan aan la helin, ama 65% la ansixiyay, bukaanku wuxuu macluumaadkan ku heli doonaa bayaanka biilasha.
f. Haddii bukaanku dareemo inuu u qalmo kaalmo dhaqaale ama heerka sarreeya ee lagu bixiyay kaalmada dhaqaale ee aan ahayn waxa lagu siiyay baaritaanka la saadaalinayo, bukaanku wuxuu ku codsan karaa Codsiga Kaalmada Dhaqalaha ka hor inta aan adeegyada la helin, ama ilaa 12 bilood ka dib taariikhda adeegga.

7. <u>Codsashada Kaalmada Dhaqaalaha iyada oo loo marayo Codsiga Kaalmada Dhaqaalaha</u>
   a. Codsiyada Kaalmada Dhaqaalaha waxaa badanaa la isticmaalaa marka macluumaad ku filan aan laga heli karin habraacyada baaritaanka gacanta ama otomaatiga ah ama marka la aqoonsado kala duwanaansho oo loo baahdo macluumaad dheeraad ah si loo gaaro go'aan.
   b. Codsiga codsiyada kaalmada dhaqaalaha waxaa sidoo kale lagu samayn karaa hadal ahaan ama qoraal ahaan wakhti kasta ka hor, inta lagu jiro, ama 12 bilood ka dib bixinta daryeelka.
   c. Codsiyada kaalmada dhaqaalaha waxaa soo jeedin kara ilo aan ahayn bukaanka, sida dhakhtarka bukaanka, xubnaha qoyska, kooxaha bulshada ama diinta, adeegyada bulshada, ama shaqaalaha nidaamka caafimaadka. Shaqaaluhu waxay la xiriiri doonaan bukaanka ama wakiilkooda si ay u dhammaystiraan baaritaanka.
   d. Qof kasta oo OHSU ka codsanayo kaalmo dhaqaale waxaa laga baari doonaa barnaamijyada caafimaad ee u qalma ka hor inta aan la siin Codsiga Kaalmada Dhaqaalaha, oo ay ku jiraan tilmaamo ku saabsan sida loo codsado.
   e. Tixgelinta kaalmada dhaqaalaha waxay dhici doontaa marka codsaduhu uu keeno Codsiga Kaalmada Dhaqaalaha oo dhammaystiran oo wata dukumentiyo taageeraya, oo ay ku jiraan xaqiijinta dakhliga. Caddaynta la aqbali karo ee dakhliga waxaa ka mid ah kuwan soo socda:
      i. Waraaqaha mushaharka ee saddexdii bilood ee ugu dambeeyay
      ii. Nuqul ka mid ah soo celinta canshuurta IRS ee sanadka ugu dambeeyay
      iii. Xaqiijinta Gargaarka Bulshada ama dheefaha shaqo la'aanta
      iv. Nuqul ka mid ah bayaanada bangiga si loo xaqiijiyo ilaha kale ee dakhli

      Haddii dakhli aanu jirin, warqad taageero ah oo ka timid shakhsiyaadka bixinaya baahiyaha aasaasiga ah ee nolosha bukaanka ayaa la aqbali doonaa. OHSU waxay u baahan kartaa xaqiijin dheeraad ah oo dakhliga ah.
   f. OHSU waxay dhammaan codsiyada iyo dukumentiyada taageeraya ah ka dhigi doontaa kuwo qarsoon.
   g. OHSU waxay, iyada oo kharashkeeda bixinaysa, codsan kartaa jeegga deynta jilicsan si loo sii xaqiijiyo macluumaadka ku jira codsiga.
   h. OHSU waxay samayn doontaa isku day kasta oo ay ku samaynayso go'aamada kaalmada muddo 21 maalmood gudahooda kadib marka ay hesho Codsiga Kaalmada Dhaqaalaha oo dhamaystiran.
   i. Codsiyada kaalmada dhaqaalaha ee aan dhammaystirnayn waxaa la hayn doonaa muddo 90 maalmood ah. Haddii dukumentiyo sax ah aan la helin 90-kaas maalmood gudahood, markaa waxaa laga yaabaa in loo baahdo codsi cusub.
   j. Marka codsi loo go'aamiyo inuu dhammaystirnayn, bukaanka ayaa lagu soo wargelin doonaa toban (10) maalmood gudahood.
      i. Ogeysiiska waxaa ku jiri doona macluumaadka dheeraadka ah ee loo baahan yahay si loo go'aamiyo, tallaabada loo baahan yahay in la qaado si loo dhammaystiro codsiga, iyo sidoo kale macluumaadka xiriirka ee su'aalo kasta oo add qabto.

k. Ogeysiiska go'aamada kaalmada dhaqaalaha waxaa boostada loogu soo diri doonaa cidda mas'uulka ka ah. Marka uu bukaanku helo daryeel qiimo dhimis ah (halkii uu ka heli lahaa daryeel bilaash ah), heshiisyo lacag bixin oo macquul ah oo la jaanqaadaya awoodda cidda mas'uulka ka ah inay bixiso ayaa la siin doonaa lacagaha uu bixinayo bukaanku.
l. Haddii OHSU diido codsiga kaalmada dhaqaalaha ama ay bixiso kabis kharash oo ka yar 100% kharashyada bukaanka, ogeysiis ayaa loo diri doonaa toban (10) maalmood oo shaqo gudahood marka la go'aamiyo. Ogeysiiska waxaa ku jiri doona sababta diidmada, macluumaadka u-qalmitaanka ee la isticmaalay, iyo sidoo kale macluumaadka xiriirka ee su'aalaha ku saabsan diidmada. Ogeysiiska waxaa sidoo kale ku jiri doona macluumaad ku saabsan habraaca racfaanka. Habraaca racfaanka waxaa sidoo kale lagu qeexay qaybta tobnaad (10) ee xeerkan.

8. <u>U-qalmitaanka Kaalmada Dhaqaalaha oo ay ugu wacan tahay U-qalmitaanka Barnaamijka Kale</u>
   a. Kaalmo dhaqaale ayaa la bixin karaa wixiyoo aan la helin codsi dhammaystiran xaaladaha aanu bukaanku codsan balse macluumaadka kale ee la heli karo wuxuu caddaynayaa dhibaato dhaqaale oo ka dhigi karta deynta mid aan la ururin karin. Tusaalooyinka ka-reebitaannadan marka shuruudaha dukumentiyada laga dhaafayo waxaa ka mid ah, laakiin aan ku xaddidnayn:
      i. Qiimayn maaliyadeed oo madax-bannaan oo ku salaysan deynta ayaa muujinaysa caajisnimo
      ii. Go'aaminta kaalmada dhaqaalaha ee tooska ah ee 100% ayaa lagu dabaqayaa xaaladaha soo socda, haddii shuruudaha kale ee u-qalmitaanka la buuxiyo:
         1. Bukaanadu waxay leeyihiin qorshaha Medicaid oo xaddidan oo na shaqaynaya, oo ay ku jiraan caymiska Caafimaadka ee Muwaadinka Laga dhaafay (Citizen Waived Medical, CWM), ama Qorshaha Kaydinta Medicare sida SMF, SMB, ama QI-1; ama
         2. Bukaannada hadda haysta caymiska Oregon Medicaid ee shaqaynaya waxay heli doonaan caawimo ay codsadaan taariikhihii hore ee adeegga

9. <u>Muddada U-qalmitaanka</u>
   a. Ansixinta kaalmada dhaqaalaha waxay khuseyn doontaa haraaga horay loogu lahaa bukaanka laga bilaabo taariikhda oggolaanshaha oo waxaana ku jiri doonaa adeegyada u-qalma ee ay bixiso OHSU ee hal sano gudahood (365 maalmood) laga bilaabo taariikhda dhaqangalka oggolaanshaha.
   b. Muddada oggolaanshaha waa la soo gaabin karaa oo waa la joojin karaa ka hor taariikhda oggolaanshaha asalka ah haddii bukaanku leeyahay u-qalmitaan kale oo caymis ama fararuq laga helo macluumaadka u-qalmitaanka ee laga helay.
   c. Bukaannada waxay u baahan doonaan inay dib u codsadaan Kaalmada Dhaqaalaha haddii adeegyo dheeraad ah loo baahdo ka dib marka uu dhammaado oggolaanshaha.

10. <u>Rafcaan Ku Saabsan Go'aan ka soo baxay Codsiga Kaalmada Dhaqaalaha</u>
   a. Bukaanadu waxay soo gudbin karaan codsi rafcaan ah haddii ay aaminsan yihiin in codsigooda Kaalmada Dhaqaalaha aan la ansixin sida waafaqsan xeerkan.
      i. Foomka racfaanka waxaa laga heli karaa boggayaga internetka ee internetka ee ama racfaan waxaa la bilaabi karaa wixiyoo laga soo waco kooxdayada Kaalmada Dhaqaalaha lambarka 503-494-8551.
      ii. Marka racfaan la gudbiyo dhammaan hawlaha ururinta waa la hakin doonaa ilaa racfaanka laga xalliyo.
   b. Haddii bukaanku diido go'aan lagu gaaray habab aan codsi ahayn (baaritaan otomaatig ah ama gacanta ah), waa inay marka hore buuxiyaan codsiga kaalmada dhaqaalaha oo ay bixiyaan dukumentiyo dakhli oo taageeraya si loo helo go'aan dhammaystiran. Kaliya go'aannada laga soo saaro codsiga ayaa laga qaadan karaa racfaan.
   c. Dhammaan go'aannada racfaanka waa kuwo kama dambays ah waxaana loo sheegi doonaa bukaanka.

11. Bixiyeyaasha La Caymiyay
    a. Codsiyada iyo go'aannada Kaalmada Dhaqaalaha waxay daboolayaan oo keliya haraaga OHSU. Faahfaahin dheeraad ah ka eeg Lifaaqa C.

12. Qiimo-dhimista Bukaanada aan Caymiska lahayn
    a. OHSU waxay qiimo dhimis siisaa bukaanada aan haysan caymis caafimaad ama caymis kale. Qiimo dhimistani waxay hoos u dhigaysaa lacagta lagu leeyahay 65% (35% qiimo-dhimis). Qiimo dhimistan si toos ah ayaa loo isticmaali doonaa, ka dibna wixii kaalmo dhaqaale ah ee la ansixiyay ayaa la isticmaali doonaa si loo hubiyo inaanan ka qaadin bukaanada wax ka badan Lacagaha Guud ahaan La Bixiyo.
        i. Qiimo dhimistan ma khusayso karo Bukaanada Caalamiga ah.
    b. Miisaanka qiimo-dhimista waxaa lagu sameeyay iyadoo la xisaabinayo celceliska Qaddarka Guud ahaan lagu soo dalaco khidmadda-adeegga ee Medicare iyo dhammaan caymiska caafimaadka ee gaarka loo leeyahay iyadoo la adeegsanayo habka dib u eegista (Fiiri Lifaaqa B).

13. Dhaqanka Biilasha/Ururinta
    a. OHSU waxay ku dabaqi doontaa wixii kaalmo dhaqaale ah ee lagu go'aamiyay mas'uuliyadda bukaanka ka hor inta aanan bukaanka laguu dallacin dhammaan adeegyada caafimaad ahaan loo baahan yahay.
    b. OHSU waxay bukaanka u diri doontaa ugu yaraan saddex (3) bayaan, iyagoo bukaanka u sheegaysa lacagta la bixinayo iyo fursadda uu bukaanku u leeyahay inuu buuxiyo Codsiga Kaalmada Dhaqaalaha. OHSU waxay sidoo kale isku dayi doontaa inay bukaanka kula xiriirto taleefanka lambarka uu bixiyay bukaanku (haddii u jiro) si ay bukaanka ugu wargeliso lacagta la bixinayo iyo fursadda uu bukaanku u leeyahay inuu buuxiyo Codsiga Kaalmada Dhaqaalaha iyo in loo sheego in dhammaystirka codsigaas uu bixin karo daryeel bilaash ah ama qiimo-dhimis leh.
    c. Qabanqaabada lacag bixinta waxaa loo dejin karaa bukaanada iyadoo shuruudaha ay isku raacsan yihiin bukaanka iyo xafiisyada biilasha ee OHSU. Bukaanka sida degdegta ah u bixinaya lacagaha ee dhammaan qaybaha heshiiska lacag bixinta ee lagu heshiiyay ee adeegyada daryeelka caafimaadka laguma soo dalacayo dulsaar.
    d. Haddii baaqi lagu yeesho ka dib go'aaminta kaalmada dhaqaalaha oo bukaanku uusan u hoggaansamin heshiisyada lacag bixinta ee lagu heshiiyay, OHSU waxay samayn doontaa laba isku day oo ay bukaanka ku siinayso ogeysiis danka boostada ah. Haddii xaaladda dhaqaale ee bukaanka ay isbeddeshay, bukaanka waxaa la siin doonaa fursad uu ku sameeyo qorsheyaal cusub oo lacag bixin ah.
    e. Haddii uusan bukaanku sameynin qabanqaabada lacag bixinta, ama haddii bukaanku ku guuldareysto inuu u hoggaansamo heshiisyada lacag bixinta ee la galay, OHSU waxay akoonka lacagta lagu leeyahay u gudbin kartaa hay'ada lacag ururinta. Kahor inta aan bukaanka loo dirin lacag ururinta, OHSU waxay dhammaystiri doontaa baaritaanka kaalmada dhaqaalaha ee loo malaynayo bukaanka iyadoo la adeegsanayo iibiye dhinac saddexaad ah.
    f. OHSU waxay dooran kartaa inay akoonnada lacagta daahiyay u magacaawdo "mid samafal loo malaynaayo" marka natiijooyinka madaxa-bannaan ay muujiyaan awood la'aan in lacagta la bixiyo, iyadoo la adeegsanayo baaritaanka ururinta kahor/baaritanka hore bixiyaha.
    g. Bukaan kasta oo hoy la'aan ah ama guri la'aan ah oo aan si mala-awaal ah loo baari karin, kuwaas oo laga yaabo inaysan haysan macluumaad ku filan oo lagu baaro, ama aan dib u helin macluumaad xiligii baaritaanka mala-awaalka ah, waxaa si toos ah loogu qaadan doonaa inay hoos yimaadaan FPL, sidaas darteedna, waxay xaq u leeyihiin inay helaan 100% samafal mala-awaal ah.

## Lifaaqa A

### Shaxda Heerarka Saboolnimada Federaalka (FPL) ee 2026

OHSU waxay u adeegsataa Heerka Saboolnimada Federaalka ee 48 Gobol iyo Degmo ee Columbia

| Dadka qoyska | Dakhliga Sannadlaha ah |
|---|---|
| 1 | $15,960 |
| 2 | $21,640 |
| 3 | $27,320 |
| 4 | $33,000 |
| 5 | $38,680 |
| 6 | $44,360 |
| 7 | $50,050 |
| 8 | $55,720 |
| Qof kasta oo dheeraad ah, ku dar | $5,680 |

## Lifaaqa B

### Xisaabinta AGB iyo Shaxda

Waxaan xisaabinnaa AGB-gayaga sannad walba si aan u hubinno inaanan ka qaadin bukaan kasta oo u qalma Kaalmada Dhaqaalaha (FA) lacag ka badan inta guud ahaan lagu soo dallaco. Habka loo isticmaalo xisaabinta AGB waa hab dib-u-eegis taariikheed oo ku salaysan sheegashooyinka dhabta ah ee la bixiyay ee khidmadda adeegga Medicare iyo bixiyeyaasha gaarka loo leeyahay. Boqolkiiba hal celcelis ahaan kharashyada guud ama boqolley badan oo loogu talagalay qaybaha kala duwan ee daryeelka ama alaabada ama adeegyada gaarka ah. Heerka AGB waxaa la cusbooneysiin doonaa sannad kasta bisha Janaayo ee sannad kasta waxaana la hirgelin doonaa 120 maalmood oo isbeddel kasta oo heerka AGB ah. Habka aanu adeegsanno ee 100% Kaalmada Dhaqaalaha (FA) ah wuxuu u suurta geliyaa bukaanada inay bixiyaan khidmado 0% ah, iyo 65% Kaalmada Dhaqaalaha (FA), OHSU waxay marka hore qaadataa 35% qiimo-dhimista iska-bixinta ka dibna qiimo-dhimis Kaalmada Dhaqalaha (FA) ee 65% ah, taasoo bukaanka ka dhigaysa inuu bixiyo 22.75% khidmadaha, taasoo ka yar AGB ga saddexda hay'adood.

| Xarunta | Adeegga | Dhaqan galka | Heerka AGB |
|---|---|---|---|
| Isbitaalka iyo Rugaha Caafimaadka ee OHSU | Dhammaan Adeegyada | 3/1/2025 | 37.30% |
| Hillsboro Medical Center | Dhammaan Adeegyada | 3/1/2025 | 31.80% |
| Adventist Health Portland | Dhammaan Adeegyada | 3/1/2025 | 23.10% |

## Lifaaqa C

Xeerka kaalmada dhaqaalaha ee OHSU wuxuu wax ka qabanayaa dhammaan bixiyeyaasha qayb ka ah Qorshaha Dhaqanka OHSU ee Oregon Health and Sciences University. Meesha kaliya ee laga saarayo kaalmada dhaqaalaha ee hoos timaada xeerkan waa OHSU Richmond Family Medicine Clinic and OHSU East Portland Family Medicine Clinic, kuwaas oo raacaya tilmaamaha Xarunta Caafimaadka ee Federaalka u Qalmta (Federally Qualified Health Center, FQHC) iyo adeegyada laga bixiyo School of Dentistry ee hoos yimaada Barnaamijka Adeegyada Qiimo-dhimista ee School of Dentistry.

## Lifaaqa D

Macluumaadka Xiriirka Biilasha si loo codsado macluumaad ku saabsan kaalmada dhaqaalaha ama loo codsado tixgelinta dhibaatada ka dib marka la sameeyo go'aanka kaalmada dhaqaalaha, oo bukaankuna laga helo dakhli ka badan ama qayb kaalmo ah.

OHSU & Hillsboro Medical Center
503-494-8760

**TIXRAACYADA MUHIIMKA AH:** Lama Heli Karo

**DUKUMINTIYADA LA XIRIIRA/XIRIIRIYAYAASHA DIBADDA:**

- Codsiga Kaalmada Dhaqaalaha
- Xeerka Qiimo-Dhimista Iska-bixinta ee OHSU
- Xeerka Lacag-bixinta Bukaanka Caalamiga ah ee OHSU
- Gunnooyinka Dhaqaale ee Dhibrinta iyo Musiibada ee OHSU

**GUDDIGA ANSIXINTA:**

- Kaaliyaha Agaasimaha, Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka
- Agaasime Sare, Adeegyada Helitaanka Bukaanka
- Madaxweyne Ku-xigeenka Wareegga Dakhliga
- Madaxweyne Ku-xigeenka Sare ee OHSU, Madaxa Sare ee Xisaabaadka

**TAARIIKHDA DIB-U-EEGISTA** (Taariikhda dib-u-eegista - sharraxaad kooban oo ku saabsan isbeddelka, dib-u-eegista saddex-sanadlaha ah, cusboonaysiinta sharciyeynta, bayaanka siyaasadda ee la beddelay, iwm.)

**Shaxda Taariikhda Dib-u-eegista**

| Lambarka Dukumentiga iyo Heerka Dib-u-eegista | Ansixinta Kama Dambeysta ah | Sharaxaad kooban oo ku saabsan isbeddelka/dib-u-eegista |
|---|---|---|
| HC-FSM-112-POL Rev.010820 | Adeegyada Maaliyadda | Sharaxaad faahfaahsan oo ku saabsan habraaca iyo qaybaha kaalmada dhaqaalaha. Luuqada la cusbooneysiiyay oo loogu talagalay isbeddellada/u hoggaansanaanta sharciyeed |
| HC-FSM-112-POL Rev.032920 | Adeegyada Maaliyadda | Shaxda dakhliga FPL ee la cusbooneysiiyay, luuqada la cusbooneysiiyay |
| HC-FSM-112-POL Rev.060221 | Adeegyada Maaliyadda | Luqadda u hoggaansanaanta oo la cusbooneysiiyay, shaxda dakhliga FPL oo la cusbooneysiiyay |
| HC-FSM-112-POL Rev.030922 | Adeegyada Maaliyadda | Luqadda u hoggaansanaanta oo la cusbooneysiiyay, shaxda dakhliga FPL oo la cusbooneysiiyay |
| HC-FMS-112-POL Rev.05312023 | Adeegyada Maaliyadda | Sixitaanka Shaxda Dakhliga FPL |
| HC-FSM-112-POL Rev.030226 | Adeegyada Maaliyadda | FPL & AGB la cusbooneysiiyay, shuruudaha u hoggaansanaanta HB3320 oo la cusbooneysiiyay |
| HC-FSM-112-POL Rev.030926 | Adeegyada Maaliyadda | FPL & AGP la cusbooneysiiyay, habraaca la cusbooneysiiyay ee baaritaanka otomaatiga ah |
| HC-FSM-112-POL Rev.040826 | Adeegyada Maaliyadda | Cusbooneysiinta sharciyeynta sababo la xiriirta ansixinta HB4040 |